# Talaallada ka hortagaaya HPV, MenACWY iyo Tdap

Xog loogu talagalay waalidiinta iyo ardayda ku jira Sanadka Koobaad ee dugsiga sare

## Xog ku saabsan Waraaqdaan tilmaamaha

Waraaqdaan xogta waxaa loogu talagalay waalidiinta iyo ardayda, waxaana filaynaa inaad isla akhrin doontaan.

Kooxaha talaalka dugsiga ee HSE ayaa siin doona talaallada HPV, Tdap iyo Men ACWY dhammaan ardayda sanadka koobaad ku jira - wiilasha iyo hablahaba. Talaalladaan waxaa badanaa lagu baxshaa labo booqasho, mid lagu baxsho teeramka koobaad iyo mid la baxsho 5 ilaa 6 bilood kadib. Waxaan u baahan nahay in waalidiinta iyo masuuliyiintu akhriyaan, saxiixaan ayna soo ceshaan foom kooban si ay u muujiyaan inay aqbalayaan in cunugooda la siiyo talaaladaan. Foomkaan waxaa loogu yeeraa “Foomka Ogolanshaha Talaalka 2022/2023 ee carruurta bilaabaaya Sanadka 1aad ee dugsiga sare si loo siiyo talaallada HPV, Tdap iyo MenACWY”

Waraaqdaan xogtu waxay kaaga waramaysaa:
- Talaallada la siiyo ardayda sanadka koobaad – cudurada ay ka hortagaan iyo kuurooyinka loo baahan yahay
- xog ku saabsan booqashooyinka dugsiga ee kooxaha talaalka
- su'aalaha badanaa la iswaydiiyo
- Meesha aad ka helayso xog dheeraad ah
- foomka ogollaanshaha

Haddii aad qabto su'aalo ka waalid ahaan ama arday ahaan oo ku aadan qayb kasta oo kamid ah waraaqdaan xogta, fadlan la xariir xubin kamid ah kooxda talaalka. Lambarka taleefanka kooxdaada maxaliga ah ayaa ku qoran baakadaan.

## Talaallada aan bixino

Talaalku waa walax ku siinaysa difaac (gaashaan) ka dhan ah cudur gaar ah. Waxa ajira sadex talaal oo la baxsho si looga hortago cuduradaan faafa.

Talaalka HPV wuxuu ka hortagaa fayraska HPV kaasoo keeni kara kansar ku dhaca wiilasha iyo hablaha.
Talaalka MenACWY wuxuu ka hortagaa afar nooc oo xanuunnada meningococcal ah oo keeni kara caabuqa meningitis (nabaro kasoo baxa xididada maskaxda) iyo/ama septicaemia (sunta dhiiga).
Talaalka Tdap kaasoo kahortaga:
- teetanada (sunta teetanada ayaa keeni kara murqo xanuun daran iyo murqo gariir)
- gawracatada (waa bakteeriyo keena dhuun xanuun iyo dhibaatooyinka neefta oo daran) iyo
- jix-dheerta (waa bakteeriyo sidoo kale loo yaqaano xiiqda waxayna keentaa qufac xad dhaaf ah iyo matag)

Talaalka HPV: wuxuu ka hortagaa kansarka
Talaalka MenACWY: wuxuu ka hortagaa meningitis
Talaalka Tdap: wuxuu ka hortagaa bakteeriyo khatar badan

## Booqashooyinka kooxda talaalka dugsiga

Kooxaha talaalka dugsiga ee HSE ayaa booqan doona dugsiyada labo jeer si ay ardayda u siiyaan talaallada. Talaallada soo socda waxaa la baxshaa booqasho kasta
- Booqashada 1 ee teeramka koobaad: Talaalka HPV iyo Tdap (2 cirbadood)
- Booqashada 2 oo dhacaysa ku dhawaad 6 bilood kadib: Talaalka HPV iyo MenACWY (2 cirbadood)

Barnaamijka talaalka dugsiga ee HSE ayaa u baahan kara in lagu baxsho goob kale ama dib ayaa loo dhigi karaa cudurka COVID-19 awgiis. Waxaan samayn doonaa wax kasta si aan u yarayno isbadellada imaan kara.

Hal talaal ayaa lagu dhuftaa gacan kasta.

# Talaallada - faahfaahin ku saabsan mid kasta

## Talaalka 1 Talaalka HPV – wiilasha iyo hablaha

### Waa maxay HPV?

HPV waxay u taagan tahay 'human papillomavirus', kaasoo ah koox fayrasyo ah oo ka badan 100. Fayraska HPV ayaa aad u badan; inta badan dadka waxaa ku dhaca nooc kamid ah HPV intay nool yihiin. Waxaad ka qaadi kartaa fayraska HPV inaad galmo la samayso qof horay u qabay fayraska. Inta badan caabuqyada HPV uma baahna daawo. Hase yeeshee, dadka qaar, caabuqa HPV ayaa ku raagi kara kadibna keeni kara kansar.

HPV ayaa sidoo kale keena xanuunka isnadaamiiska xubnaha taranka.

Talaalka HPV ayaa ka hortaga kansarka minka iyo kansarada kale. Talaalka HPV waxaa loo yaqaanaa Gardasil 9.

### Maxaa talaalka HPV loo baxshaa?

Talaalka HPV ayaa la siinaayay hablaha ku jira sanadka koobaad lagasoo bilaabo 2010. Tan waxaa sabab u ah in kansarka ugu badan ee uu HPV keeno uu yahay kansarka minka – kansar ku dhaca afka hore ee minka.

Hase yeeshee, fayraska HPV ayaa keeni kara kansaro kale iyo xanuunno saamayn kara wiilasha, lagasoo bilaabo Sibteembar 2019, wiilasha ayaa sidoo kale la siinaayay talaalka HPV. Hadba inta la kordhiyo da'yarta qaadanaysa talaalka – wiilasha iyo hablahaba – ayay sii yaraanaysaa faafida caabuqu.

### Wadamadee baxsha talaalka HPV?

128 wadan ayaa hadda baxsha barnaamijka talaalka HPV, ayadoo in ka badan 30 kamid ah wadamadaan ay siiyaan talaalka hablaha iyo wiilashaba. Wadamadaan waxaa ku jira:

- Australia
- Talyaaniga
- New Zealand
- Norway
- Boqortooyada Ingiriiska
- Maraykanka

Waxaa jira xog badan oo ku saabsan guulaha laga gaaray barnaamijyadaan oo aad ka helayso www.hpv.ie

Talaalka HPV waxaa laga baxshaa in ka badan 120 wadan si looga hortago kansarka

Talaalka HPV waxaa la siiyaa wiilasha iyo gabdhaha ku jira sanadka koobaad ee dugsiga sare.

### Waa maxay kansarada uu HPV keeno?

Fayraska HPV ayaa keeni kara noocyada kaladuwan ee kansarada – unugyo jiran – oo ku dhaca ragga iyo dumarka labadaba. Fayraska HPV ayaa keena:

- ku dhawaad dhammaan kansarada minka
- 5 kamid ah 10 kii kansar ee xubinta taranka haweenka
- 7 kamid ah 10 kii kansar ee xubinta taranka haweenka
- 9 kamid ah 10 kii kansar oo ku dhaca dabada kana dhasha HPV

• 9 kamid ah 10 kii xanuun oo kamid ah isnadaamiska hubnaha taranka.

Cilmi baaris ayaa muujinaysa in cabauqa HPV uu sidoo kale keeno kansarada:
• afka iyo dhuunta (oropharynx)
• kansarka dabada (futada)
• jansarka guska

HPV ayaa keena 1 kamid ah 20 kansar oo ka dhaca aduunyada
In ka badan 400,000 oo arday oo ku nool Ireland iyo 100 milyan oo qof oo ku nool aduunyada oo dhan ayaa qaatay talaalka HPV

Meeqa kuuro oo talaalka HPV ah ayaa loo baahan yahay?
Inta badan dadka labo kuuro oo talaalka kamid ah ayaa lagu talinayaa.
Ardayda waxaa la siinayaa kuurada koobaad teeramka koobaad halka kuurada labaad la siinaayo 6 bilood kadib.

Sanadka koobaad ee dugsiga sare ayaa ah waqtiga ugu haboon talaalka, maadaama uu ugu haboon yahay ilmaha da'daan ku jira.

## Talaalka 2 MenACWY

### Waa maxay cudurka meningococcal?
Xanuunka Meningococcal waa xanuun daran oo keenaaya meningitis (hulaaqa xididada gudaha maskaxda) iyo septicaemia (sunta dhiiga) wuxuuna keeni kara adhimasho. Waxaa jira tiro noocyo kaladuwan oo bakteeriyada meningococcal kamid ah dhammaan carruurtana waa in la siiyaa talaal si looga difaaco koocda C ee xanuunka meningococcal marka ay dhashaan.

Talaalka MenACWY ayaa kordhinaaya difaaca ka dhanka ah cudurka kooxda C ee meningococcal. Wuxuu sidoo kale ku siinayaa difaac ka dhan ah meningococcal kooxda A, W iyo Y. Waxaa intaas dheer, talaalkaan ayaa sidoo kale yareeya khatarta qaadista cudurka marka wuxuu difaaci karaa dadka kale. Talaalka MenACWY waxa aloogu yeeraa Nimenrix.

Talaakaan kaama difaacaayo dhammaan kooxaha bakteeriyada meningococcal, tusaale kooxda B, ama bakteeriyada kale oo keeni karta meningitis, marka sidoo kale waa muhiim inaad taqaano astaamaha aad iska eegayso iyo inaad daryeel caafimaad oo degdeg ah raadsato.

Cudurka Meningococcal ayaa ku bilaaban kara si degdeg ah. Astaamaha waxaa kamid ah qandho, qoor adayg, madax xanuun, xanuunka kala-goysyada iyo faruurac. Cudurka Meningococcal ayaa ku dhici kara da' kasta, laakiin wuxuu ugu badan yahay carruurta kayar 5 sano jir, gaar ahaanna ilmaha ka yar 1 sano jir. Kooxda xigta ee khatarta wayn ugu jirta waa da'yarta da'doodu u dhexayso 15-19 sano.

### Meeqa kuuro oo talaalka MenACWY ah ayaa loo baahan yahay?
Keliya hal kuuro oo kamid ah talaalka Men ACWY ayaa loo baahan yahay si difaac loo helo.

## Talaalka 3 Talaalka Tdap

### Waa maxay Tdap?
Tdap waxay u taagan tahay teetanada, qaamoow-qashiirka iyo jix-dheerta (xiiqda).

Talaalkaan ayaa kahortagaaya bakteeriyo iyo sun muhiim ah. Talaalka Tdap waxa aloogu yeeraa Boostrix.

Teetanada ayaa keeni karta xanuunka murqaha, gariirka murqaha iyo daan qalal (inay kugu adkaato inaad afka kala qaado sabab la xariirta xanuunka murqaha) taasoo keenaysa in neeftu kugu dhagto iyo dhimasho.

Qamoow-qashiirku waa xanuun daran oo badanaa ku biloowda dhuun xanuun kaasoo degdeg u faafa keenaayana dhibaatooyinka neefsiga. Sidoo kale waxay waxyeelo u gaysan kartaa wadnaha iyo neerfeyaasha.

Jix dheerta (xiiqda) waa xanuun keeni kara qufac muddo badan socda, saxasho iyo matag oo qofka ku adkayn karta inuu neefsado.

Dhammaan caabuqyadaan Dhammaan caabuqyadaan waa xanuunno daran oo keeni kara in isbitaal lagu dhigo. Mararka ugu xun, xanuunadaan ayaa keeni kara dhimasho.

Meeqa kuuro oo talaalka gawracada, teetanaha iyo jix-dheerta ah ayaa loo baahan yahay si difaac buuxa loo helo?
Markuu gaaro lix sano ilmo kasta waa inuu qaatay afarta kuuro ee talaallada teetanaha, gawracatada iyo jix-dheerta (xiiqda) - kaasoo ah:
• 3 kuuro ilmihiiba
• kuurada xoojinta ah ee Ilmaha fasallada hoose ee dugsiga hoose

Difaac laga helo xanuunadaan ayaa hoos u dhacaysa muddo kadib marka kuuro xoojin ah ayaa lagu talinayaa hadda si uu u helo difaac dheeri ah.

Kuurada xoojintu waa kuuro dheeri ah kuuro lagu kordhinaayo. Kani waa kuuradooda shanaad uguna danbaysa waxayna siinaysaa difaac muddo soconaaya.

Shanta kuuro ayaa dhamaystiraysa taxanahaaga talaalka

# Su'aalaha guud

**Miyuu arday sugi karaa ilaa intuu noqonaayo qof wayn si uu u qaato talaalka HPV, MenACWY ama talaalka Tdap?**
Banaamijka dugsiga ee HSE ayaa siiya talaallada HPV, MenACWY iyo Tdap ardayda ku jira sanadka koobaad ee dugsiga sare. Haddii aad doorato inaad sugto ilaa cunugaagu ka waynaanaayo si uu u qaato talaalka, waxaad u baahan doontaa in cunugaaga uu talaalo dhakhtarkaaga guud (dhakhtarka maxaliga ah) waxaadna u baahan doontaa inaad bixiso qarashka maamulka iyo talaallada.

**Miyaan heli doonaa diiwaanka talaallada ma baxshay?**
Haa. Maalinta talaalka, cadaynta talaalka ayay cusboonaysiin doonaa kooxda talaalka ee dugsigu. Haddii aadan haysan cadayn talaal, xubin kamid ah kooxda talaalka ayaa ku siin doonta mid kamid talaalka.

**Sidee ayay ardaydu ugu diyaar garoobayaan maalinta talaalka?**
Maalinta talaalka, ardaydu waa inay:
• Cunaan quraac
• Waa inay xidhaan shaar dabacsan oo gacmo gaab ah

**Sidee ayaan ku ogaanaynaa in talaalladu yihiin kuwo amaan ah?**
Dhammaan talaallada ayaa ah kuwo amaan ah waxaana la xaqiijiyay inay naf badbaadinayaan ayna ka hortagaan xanuunka. Talaallada ayaa si adag loola soconayaa waxaana si joogto ah u qiimeeya ururo caalami ah oo ay ku jiraan:
• World Health Organization (Ururka Caafimaadka Aduunka)
• European Medicines Agency (Wakaalada Daawooyinka ee Yurub)
• Centers for Disease Control and Prevention (Hay'ada Xakameynta iyo Kahortagga Xanuunada) ee Maraykanka

Dhammaan ururada caalamiga ah ayaa soo sheegay in talaallada laga isticmaalo Ireland ay yihiin kuwo badqab leh aana lahayn cilado kale oo la ogyahay.

**Talaalladu ma leeyihiin cilado muddo kooban soconaaya?**
Inta badan ardayda ma dareemaan wax cilad ah kadib talaalka.

ardayda qaar ayaa qabi kara xanuunka, bararka iyo gaduudashada gacanta meesha cirbada looga muday.

Ardayda qaar ayaa dareemi kara madax xanuun, calool xanuun ama heerkulkoodu kici karaa. Arintaan uma baahna inaad ka walwasho maadaama ay badanaa kaa ba'ayso maalin ama labo kadib.

**Talaalladu ma leeyihiin cilado muddo fog soconaaya?**
Ma jiraan ciladaha mudada dheer oo la hayo.

# Meesha aad ka helayso xog dheeraad ah

Haddii aad qabto su'aalo, fadlan kala hadal xubin kamid ah kooxdaada talaalka dugsiga ee HSE, kalkaalisadaada Caafimaadka Dadwaynaha ama dhakhtarkaaga guud (GP). Waxaad ka helaysaa faahfaahinta meesha aad kala xariirayso kooxda talaalka gudaha baakadaan.

Waxaad sidoo kale booqan kartaa **www.hpv.ie** iyo **www.immunisation.ie** si aad u hesho muuqaallo iyo xaashiyaha xogta ee ku saabsan talaallada. Waxaan kugu boorinaynaa inaad akhrido “Xaqiiqooyinka ku saabsan Talaallada ardayda bilaabaaya dugsiga sare” oo ku jirta webseedkeena.

Waxaad sidoo kale heli kartaa lifaaqyada aad ka helayso waraaqaha xogta ee bukaanka oo ka hadlaaya talaallada barta **www.hpra.ie**. Ka raadi Gardasil 9 (HPV), Nimenrix (MenACWY) iyo Boostrix (Tdap) si aad u akhrido waraaqda xogta bukaanka ee talaalada qusaysa.

# Foomka ogolaanshaha ee talaallada

Waxaad u baahan tahay inaad akhrido ama saxiixdo foomka ogolaanshaha oo ku jira baakadaan aadna ku celiso dugsiga si aad u xaqiijiso in cunugaagu talaallada ku qaato dugsiga. Waxaad u adeegsan kartaa boqshada lagu siiyay si aad foomka ugu celiso dugsiga.
Barnaamijka talaalka dugsiga ee HSE ayaa lagu samayn karaa goob kale ama dib ayaa loo dhigi karaa cudurka COVID-19 awgiis.

Waxaa daabacay HSE National Immunisation Office (Xafiiska Talaallada Qaran ee HSE), Luuliyo 2022.